



Macluumaad ku saabsan noqoshada ikhtiyaariga ah

SOMALI

Maxaa dhacaya haddii codsigaaga magangalyada la diido?

Si wada jir ah **diidmada codsiga magangalyada**, waxaa lagugu wargelin doonaa **waqtiga** kama dambaysta ah ee aad dalka uga baxayso. Muddadani badanaa waa **hal usbuuc ilaa 30 maalmood**. **Haddii aanad si ikhtiyaari ah uga bixin dalka muddadan, wawa si qasab ah lagugu celin karaa dalkaagi** (dib u celinta). Waa inaad adigu iska bixisaa kharashaadka dib u celintaada sanado badanna ma awoodi doontid inaad si sharci ah ku gashid Jarmalka ama wadan kale oo Midowga Yurub ah (mamnuucida gelitaanka). Ma joogi kartid Jarmalka sharci degenaansho la'aanteed oo sax ah: waa inaad ku talogashaa in booliisku ku xidhayo oo dib loogu celinayo waddankaaga hooyo wakhti kasta. **Ka faaídayso fursada noqoshada ikhtiyaarka ah ka hor inta aan la bilaabin tallaabooyinka lagu joojinayo joogitaankaaga.**

Ku noqoshada ikhtiyaarka ah ee dalkaaga asalka ah waxaa taageerta dawladda Jarmalka

Barnaamijyada dib u noqoshada iyo dib u la qabsiga waxay ku siinayaan kaalmo balaadhan - tusaale ahaan, haddii aanad haysan lacag aad adigu iska bixisid. Kuwa si iskood ah ugu laabanaya wadamada ay ka yimaadeen, taageero dheeraad ah ayaa loo heli karaa si ay ugu fududaato inay dib ugu bilaabaan wadankii ay ka yimaadeen. Maalgelintu waxay awood kuu siinaysaa inaad si madaxbanaan dalka uga baxdo oo aad si taxadar leh u diyariso bixitaankaaga.

Taageero nooceee ah ayaad heli kartaa?

Barnaamijka dib u celinta waxaa uu ku siinayaan taageero qorshe iyo mid dhqaale marka aad dalka si ikhtiyaari ah uga baxdo.

- Bixinta kharashka safarka
- Bixinta taageerada maaliyadeed ee muhiimka ah
- Bixinta kharashaadka caafimaadka



Barnaamijyo kala duwan oo dib-u-dhexgalka ayaa ku caawin kara - Bilawga la qabsashada cusub ee waddankii asalka ahaa.

- Tallaabooyinka tayaynta xirfadaha
- Caawinta shaqo raadinta
- Kaalmada bilaabida ganacsi yar
- Taageerada guriyeynta
- Talo iyo taageero xagga bulshada iyo arrimaha caafimaadka ah



Halkee ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah?


Bogga macluumaadka ee dib u noqoshada ikhtiyaarka ah www.ReturningfromGermany.de waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan wadamada asal ahaan ka soo jeedaan iyo sidoo kale barnaamijyada dib u celinta iyo dib u dhexgeliinta waxaadna ka heli kartaa xarunta raadinta si aad u hesho xarunta latalinta soo laabashada ee kuugu dhow. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa khadka dib u laabashada BAMF: +49 911 943 - 0



La-talinta dib u noqoshada ayaa wax badan ku caawin doonta

Haddii aad xiisaynayo inaad si ikhtiyaari ah ugu laabato waddankaagii asalka ahaa, waxaad la xidhiidhi kartaa adeega latalinta soo laabashada wixii su'aalo ah ee aad qabtid.

- La-talinta soo laabashadu waa bilaash, waana sir iyo mid gaar ah.
- Waxay kugu taageeri doontaa abaabulka iyo diyaarinta bixiddaada, soo gudbinta codsiyada maalgelinta iyo, haddii loo baahdo, cadsashada gargaar dheeraad ah.
- Wixa kale oo aad heli doontaa taageero aad ku hesho warqadda baasaboorka beddelka ah haddii aanad haysan dukumeenti socdaal oo sax ah.
- Turjubaan ayaa loo yeeri doonaa si aad wax walba u fahmi karto inta wada tashigu socdo. Si kastaba ha ahaatee, waxaad sidoo kale keeni kartaa qof kula jooga xarunta la-talinta soo celinta kaas oo kuu turjumi doona.



Dib u noqoshada ikhtiyaarka ah ma suurtogal tahay wakhti kasta?

Dib u noqoshada ikhtiyaarka ah waxay sidoo kale u fureysaa fursado iyo aragtiyo cusub oo wadankii ay asal ahaan ka yimaadeen magangalya doonka aan nidaamka magangalyada aan wali loo dhamaystirin iyo dadka horay loo siiyay degenaansho.

Waxaad aadi kartaa goobta la-talinta dib u laabasho ah iyadoo nidaamka magangalyadu uu weli socdo. Tani wax saameyn ah kuma laha natijada dacwadda.



Ma xiisaynaysaa soo noqoshada ikhtiyaarka ah? Ballan ka samee adeega latalinta soo noqoshada ee kuugu dhow: